



Federal Republic of Somalia  
Federal Parliament  
The Upper House

Nuqulka Rasmiga Ah ee Hadal Qoraalka Gaaban ee Golaha Aqalka Sare ee BFS  
Si waafaqsan Qod. 39aad ee Xeer hoosaadka Golaha Aqalka Sare

| Baarlamaanka 11 <sup>aad</sup>                                                                      |                                                                                                                                                                                                                                                                                                                                                                                                                                                                     |
|-----------------------------------------------------------------------------------------------------|---------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------|
| Kalfadhiga: 6aad                                                                                    | Kulanka: 3aad                                                                                                                                                                                                                                                                                                                                                                                                                                                       |
| Taariikhda: 26/04/2025                                                                              | Goobta Fadhiga: Xarunta Aqalka Sare                                                                                                                                                                                                                                                                                                                                                                                                                                 |
| Saacadda uu Furmay: 11:18 AM                                                                        | Saacadda uu Xirmay: 12:32 PM                                                                                                                                                                                                                                                                                                                                                                                                                                        |
| Shir Guddoonka Fadhiga:<br>Guddoomiyaha Golaha Aqalka Sare<br>Senator Cabdi Xaashi Cabdullahi.      | Guntanka Kulanka: 29 Senator                                                                                                                                                                                                                                                                                                                                                                                                                                        |
| Martida Kulanka:<br>Wasiir ku xigeenka Wasaaradda<br>Maaliyadda Mudane Cabdiqafaar Cilmi<br>Xaange. | Ajendayaasha Kulanka:<br>1. Akhriinta Ayadaha Qur'aanka<br>2. Ansixinta Ajandaha<br>3. Akhrinta 2 <sup>aad</sup> ee Hindise-sharciyeedka Hay'addaha Maaliyadda.<br>4. Akhrinta 2 <sup>aad</sup> ee Hindise-sharciyeedka Canshuuraha Dakhliga<br>5. Akhrinta 2 <sup>aad</sup> ee Hindise-sharciyeedka Shirkadaha Camiska.<br>6. Akhrinta 2 <sup>aad</sup> ee Hindise-sharciyeedka Wax-ka-badalka Sharciga<br>Lacag Dhaqista iyo ka Hortaga Maalgelinta Argagixisada. |

### **Furitaanka Kulanka:**

Senator Xasan Xusen Xaji ayaa akhriyey Aayadaha Quraanka ee Kulanka lagu furay.

### **Ansixinta Ajendayaasha Kulanka:**

Guddoomiyaha Golaha Aqalka Sare Senator Cabdi Xaashi Cabdullahi ayaa xubnaha kulanka fadhiyey ka codsaday in ay ansixiyaan Ajendaha kulanka, codaynta ayaa u dhacday sidaan:

**Oggol: 28 Senator**

**Ka aamusay: Majirin**

**Diidmo: Majirin**

### **Nuxurka Kulanka:**

Guddoomiyaha Golaha Aqalka Sare Senator Cabdi Xaashi Cabdullahi ayaa u yeeray Guddoomiyaha Guddiga Dhaqaalaha, Maaliyadda, Ganacsiga, Warshadaha, Isgaarsiinta iyo Dalxiiska Senator Cabdi Axmed Dhuxulow (Dhagdheer), si uu Golaha uga hor akhriyo Warbixinada Akhrinta 2<sup>aad</sup> ee Hindise-sharciyeedka Hay'addaha Maaliyadda, Akhrinta 2<sup>aad</sup> ee Hindise-sharciyeedka Canshuuraha Dakhliga, Akhrinta 2<sup>aad</sup> ee Hindise-sharciyeedka Shirkadaha Camiska iyo Akhrinta 2<sup>aad</sup> ee Hindise-sharciyeedka Wax-ka-badalka Sharciga Lacag Dhaqista iyo ka Hortaga Maalgelinta Argagixisada. Warbixinta kaddib, 5 Senator ayaa dood iyo su'aalo ka dhiibtay warbixinada. intaas kaddib, Wasiir ku xigeenka Wasaaradda Maaliyadda Mudane Cabdiqafaar Cilmi Xaange ayaa ka jawaabay dhammaan su'aalihii ay xubnaha senatarada Golaha Aqalka Sare ka waydiyeen Hindise-sharciyeedyada.

### **Go'aamada kulanka:**

1. Ansixinta Ajendayaasha kulanka.
2. Guddoomiyaha Golaha Aqalka Sare Senator Cabdi Xaashi Cabdullahi ayaa faray Guddiga Dhaqaalaha, Maaliyadda, Ganacsiga, Warshadaha, Isgaarsiinta iyo Dalxiiska in ay soo diyaariyaan qodobada laga dooday, iyaga oo la kaashanaya sharciyaqaanada Golaha Aqalka Sare, si Hindise-sharciyeedyadan loo marsiiyo akhrinta saddexaad.

Ugu dambayntii, Guddoomiyaha Golaha Aqalka Sare Senator Cabdi Xaashi Cabdullahi ayaa kulanka soo xiray Sacadu markay ahayd **12:32 PM**.

**DHAMAAD**